[illegible]

= 30.09.92

Sh/G/A/1/92.

Guddonka iyo Guurtida dagaanka Waraangeli Shirkoodii Aragaaladda Hadoaftimo, 27/09/92 ilaa 30/09/92; Markay Arkeen Xaalada Talliska ah ee uu dagaanku ku sugan yahay kana dhalatay weerarka hubaysan ee uu cadowgu si isa dab joog ah muddo 3 billood ah ku hayay Gobolka kuna qabsaday Magaalo Madaxdii Dagaanka (L/corey) iyo Nawaaxigeeda.

Markay deraasad baladhan ku Sameeyeen si ooto dheerna u falanqeeyeen arinta kow ku xusan, waxay si wada jir ah isugu raaceen:

1. Xoojinta iyo ku dhaqanka diinta islaamka waa muqadas, iyada oo laga sare u ah xeer kasta oo lagaga dhaqmayo dagaanka Waraangeli.
2. Idkaynta midnimada iyo isku Duubnida dadaeynaha mandaqadu waa Muqadas.
3. Sugidda nabadgelyadda iyo adkayta difaacu waa muqadas.
4. In Mandaqada Waraangeli si ku Meelgaadh ah loo galiyo Xaalad xkun dagdag ah (State of Emergency).
5. In la sameeyo Shareecigii lagu maamuli lahaa laguna socodsiin lahaa Xukunka Xaaladda degdegga ah (Emergency Law).
6. In la dhiso Guddida Xaaladda Degdegga ah (State of Emergency Committee).
7. In la dhiso Maxkamadda Xaaladda degdegga ah iyo Xeer Ilaalintaeeda (State of Emergency Court).
8. In la dhiso Ciidan Midaysan ee Difaaca dagaanka (Regular Army).
9. In ururka Al-itixaad jiritaankiisa laga mamnuuco laguna difaacayo mandaqada Waraangeli Iriaas Wareego wixii ay hanti Guud leeyihiin (Common Property).
10. In Awoodda maamka Xaalada degdega ah hoos timaaddo Guddiga Xaalada degdega ah.
11. Taliyaha Ciidanka difaaca dagaanka Waxaa magacaabaya Suldaanka iyo Guurtida nabadoonadda ka mid yihiin.
12. Taliyaha Ciidanku waa Guddoomiyaha Guddiga Xaaladda degdega ah; waxaana u madaxbanaan yahay qaabdhismeedka Ciidanka iyo hawlgalinta garsaddisha.
13. Inaanu Waraangeli dalka kale lahayn Miyi iyo Magaalo toonna.

Waa socotaa................

13. Qod. XIII.- Qofkasta oo si kas ah u dila qof kale waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

Qod.14.- Qofkasta oo si kas ah dhaawac u gaadhsiiya qof kale waxaa lagu xukumaya sharciyada Islaamka.

Qod.15.- Ciidanka difaaca dalkanku wuxuu awood u leeyahay in uu si ku meelgaar ah ula wareego wixi hub iyo rasaas ah oo dadweynaha gacantooda ku jira hadii loo baahdo, Haana in loo diiwaan geliyo ciddo cayntooda iyo leh. Qofkasta oo is horta aga waxa si kama danbays ah loogala wareegayaa hantidii uu haalgalkooda iska hor taagay difaaca dalka.

Qod.16.- Qofkasta oo ciidanka difaaca dalkanka iska hortaaga adeegiisa gaadiidka aan hubaynmayn si ku meelgaar ah, waxaa lagu ganaaxayaa ugu Xidhan Haalmood oo Ciidanku adeegsigaa gaadiidka.

Qod.17.-Qofkasta oo lagu caddeeyo in uu gaadiidkiisa ugu adeegayay caddowga, waxaa si kama danbays ah loogala wareegayaa gaadiidkaas, isagana waxaa la warfajinayaa cham cigaa xaaladda degdegga ah.

Qod.18.- Qofkasta oo lagu caddeeyo inuu ku kacay danbiyo lidi ku ah nabadgelyadda iyo xasilloonida mandaqada sida dhaca, boobka, kufsashada, budhcadnimadda, jidgooyada, waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

Qod.19. Waxaa xaarkan lagu mamnuucay in dhuxul laga dhoofiyo mandaqada iyo in looga gaaro gobollada dibadda. Ciddii falka a ku kacda, waxaa lagala wareegayaa dhuxusha waxaana lagu ganaaxayaa F-3,000,000/-(Saddex milyan). waxa iyana la ruubay in Geeddo ama Caws laga gooyto dhulka daaqsinka ah ee mandaqada. Xaarka ciqaabta waxay la mid tahay tan dhuxusha.

Qod.20.- Dhamaan Ciqaabaha iyo Ganaaxyadda ku sugan qodobadda sharcigan waxaa qaadaysa Maxkamadda Xukunka degdegga ah, Rabaynta iyo diyaarinta Danbiyaddana waxaa u xil saaran Xeer ilaalinta Maxkamadaas.

Qod.21.- Magacaabidda Maxkamadda Xukunka degdegga ah iyo xeer ilaalintooda Waxa u xil saaran, G/G/Xaaladda degdegga ah.

Qod.22.- Fulinta iyo hirgelinta qodobadda sharcigan iyo go'aamadda maxkamadda kor ku xusan waxa u xil saaran Ciidanka difaaca dalkanka.

Iyacoo la fulinayo Qodobadda go'aanka kor ku xusan ee Shirka, waxa la soo saaray Qodobada Xeer ciqaabeedka hoos ku cadi-

CODOBADDA SHARCIGA XUKUNKA DEGDEGGA AH.
(STATE OF EMERGENCY LAW).

1. Qod.I = Dhammaan xudduuda Mandaqadda Waqooyi Galbeed waxa lagu dhaqayaa laguna xukumayaa xukun xaalad degdeg ah oo ku saal gaar ah.

2. Qod.II = Hantidda lagu leeyahay Mandaqada Waqooyi Galbeed Mood iyo Noolba waxaa loo adeegsan karaa Difaaca Degaanka.

3. Qod.III = Dhammaan dadka Ragga ah Mandaqadda da'doodunu u dhaxayso 18-45 Sanno waxaa waajib ku ah oo ay ku saaban yihiin ka qayb galka hawsha difaaca degaanka.

4. Qod.IV = Cid kasta oo lagu cadeeyo in uu si toos ah ama si dadban ugu kacay falal wiiqaya midnimada dadweynaha Mandaqadda oo Muqadas ah Waxaa lagu Ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

5. Qod.V = Qofkasta oo lagu cadeeyo inuu ka hortaag [illegible] hawlgal difaac, u basaasid cadow, taakuleyn cadow, iyo dacsayad u fidin cadow, Waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH ciqaabtaasi waxay ku dhacaysaa qofkii samayn aad ama dhamaan dambiyadaas oo dhan.

6. Qod.VI = Qofkasta oo diida waajib gudashada difaaca Degaanka waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

7. Qod.VII = Qofkasta oo amar la'aan kaga baxa Aagga difaaca, ama qolab difaac ka saara waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

8. Qod.VIII = Qofkasta oo dhoofiya ama qariya hub ama raasaas degaanka ku sugan waxaa lagala wareegayaa hubka iyo raasaasta, waxaana lagu ganaaxayaa 3-5,000,000/=(sadex ilaa shan milyan).

9. Qod.IX = Qofkasta oo lagu cadeeyo in u si kas ah u cadilay hub, gaadiid, ama isgaarsiin ciidan waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

10. Qod.X = Qofkasta oo lagu cadeeyo in uu lumeeday si gaar ah ama iibiyey hub iyo saad ciidan waxa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

11. Qod.XI = Qof kasta oo lagu cadeeyo in uu diidey bixin taakulo difaac waxaa lagu xukumayaa lagana qaadayaa taakuladii laga doonayey oo labanlaaban.

12. Qod.XII = Qofkasta oo si kaan ah u dila qof kale waxaa lagu qaadayaa Sharcaqaadda Islaamka.

Wax Socotaa...............

Qod.23.= Dhammaan Dakhliga Maxkamadda Xukunka Degdegga ah waxa lagu wareejinayaa Taakulaynta ciidanka difaaca degaanka.

Qod.24.= Waxa Sharcigan lagu maamuulay In qof seeraystox aan xirto, dhulka dadku wadaago miyoi iyo Magaalo, qofkii falkaas ku kaca laguna caddaayo waxaa lagu xukumayaa 5,000,000/=(Shan Milyan oo gamaox ah)iyo xidhmada oo lage beddiiyo.

Qod.25.= Haddii ciidan wax raafaya uu ku kaca ah u dilo ama u dhaawaco cid aan raafid mudnayn ama hanti wax yeelaayo waxaa magdhawga lagu bixinayaa magac guud.

Qod.26.= Qofkasta oo dila ama dhaawaca cid ka mid ah ciidanka x wax raafaya, waxaa lagu ciqaabayaa DIL TOOGASHO AH.

Qod.27.= Mujaahid kasta oo ku dhinta ama ku dhaawacma hawlgal raaf, waxaa qaantiisa lagu bixinayaa magac guud.

Qod.28.= Amarka raafku wuxuu sharci yahay marka uu ka soo baxo taliska ciidanka, iala markaana waa in ciidanka wax raafaya uu wataa Nin mas'uul ahi.

Qod.29.= Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa Taariikhda ay saxiixaan, Suldaanka iyo Nabadoonadda degaanka Warsangeli.

Qod.30.= Sharci kasta oo ka hor imanaya sharcigan oo ka jira degaanka Warsangeli waa la laalay.

Suldaan C/Salaan Suldaan Max'ud
GUIDONKA WARSANGELI.

Gen. C/llaahi Axmed Jamac(Ilka jiir).
G/G/Xoolada dedgdegga ah.

SAXIIXA NABADOONADDA.

1. W/S. Ismaaciil Suldaan Max'ud Cali Shire.
2. W/. C/llaahi Cartan Xaaji Faarax.
3. W/. Cali [illegible] Cali.
4. W/. Cali Muuse Cigaal.
5. W/. Bashiir Ducaale Cabdi.
6. W/. Maxamed Ismaaciil Cabdi.

Waa Socotaa...............